

MUTAYSIGA MUHAAJIRKA EE CAAWIMAADA DHAQAALAHAA EE KU SAABSAN SHARCIGA CARES

Sharciga CARES wuxuu caawimaad lacageed siiyaa dad badan oo ay saameysay COVID-19, laakiin nasiib xumo, muhaajiriinta oo dhan kuma jiraan.

LACAG-CLINTA SOO KABASHADA 2020: Maxay yihiin, yaase mudan?

Lacag-celinta soo Kabashada ("Lacag bixinta Saamaynta Dhaqaalaha") waa lacag ka timid dowladda si ay u caawiso inta lagu jiro COVID-19. Qofka keligiis ah ee leh dakhli ilaa \$ 75,000 ama "madaxa reerka" oo leh dakhli gaaraya \$ 112,000 wuxuu heli karaa \$ 1200, lammaane isqaba oo leh dakhli gaaraya ilaa \$ 150,000 waxay heli karaan \$ 2400, waalidiintuna waxay heli doonaan \$ 500 oo loogu talagalay carruurta ilaa 16 sano jira oo ku tiirsan waalidkood xagga canshuur celinta.

Waad u mudan tahay haddii:

- Aad xareysay canshuur celinta 2019 ama ~~2018~~. (Haddii aadan xareynin 2018, oo aad shaqaysay 2019 laakiin aadan dalban 2019 weli, waad xereyn kartaa canshuurtaada 2019 marka la gaaro Luulyo 15, 2020, si aad u hesho lacag-celinta)
- Aad canshuurta ku xaraysatay "Kali" adigoo haysta Sooshaal Sekuuriti (SSN) sax ah oo shaqo loo oggol yahay inta lagu jiro sannadka lagu canshuuri karo, ama
- Aad isqabtaan, oo labada qof ee isqaba lahayeen SSN sax ah oo shaqo loo oggolyahay ah sannadihii cashuurta laga qaadi lahaa.
- Ilmo kasta oo mutaysta oo ku tiirsane ah waa inuu leeyahay SSN, laakiin in aanu lahayn SSN ma horseedi doonto waalidiinta u qalmaa inay lumiyaan lacag celintooda.

Haddii aad u qalanto lacag-celinta:

- Si otomatik ah ayaad uhelaysaa, haddii aad hore u xareysay canshuur celintaada 2019 ama 2018.
- Dhigashada tooska ah ee bamkigu waxay dedejin doontaa helitaanka lacag-celintaada.
 - Haddii aad siisay IRS macluumaadkaaga dhigaalka tooska ah ee canshuur celintaada, uma baahnid inaad wax intaas ka badan sameyso si aadu hesho lacag-celinta
 - Si no incluyó información de depósito directo, consulte <https://www.irs.gov/coronavirus> para obtener actualizaciones sobre cómo obtener depósito directo.

Muhaajiriinta xaq u leh Caymiska Shaqala'aanta ee La Ballaariyey (UI)

- Waad u qalantaa haddii aad leedahay SSN oo sharci ahaan lagu oggol yahay inaad shaqeyso, oo aad la buuxiso dhammaan shuruudaha kale ee u-qalmitaanka ee qof walba (xitaa dadka Mareykanka ah) ee codsanaya UI ay tahay inuu buuxiyo.
- Xaq uma lihid haddii aadan haysan SSN, oo aad shaqaysay ama aad iskaa ugu shaqaysatey ITIN ama "qarsoodi" ku shaqaysay

LACAG-CLINTA SOO KABASHADA 2020: Yaan U QALMIN?

- Qof kasta oo cashuurta ku bixiyay ITIN (lambarka aqoonsiga cashuur bixiyaha shaqsiyeed).
- Labada qof ee isqaba oo hal lammaane oo keliya haysto SSN ansax ah, oo lagu shaqayn karo sanad cashuureedka. Xaaladdan oo kale qof qoyska ka mid ah uma qalmo lacag-celinta haddii uusan labada qof midkood militariga ku jirin muddadii sanadka canshuureedka, ama midka ka mid ah lammaanaha ee leh SSN sharci ahaan uqalma in uu ugu xereysto canshuuraha sidii "madax qoys" ama "reer leh laakiin si gooni gooni ah u xareeyey", xaaladdaas oo kale xaasku/saygu wuxuu heli karaa \$1200 (laakiin ma aha \$ 2400).
- Qof kasta oo jira 17 - 24 oo ku taxan inuu ku tiirsan yahay cashuuro waalidkood, xiitaa haddii ay xareeyeen canshuur celintooda, si ka gooni ah waalidkood.
- Qof ama lammaane isqaba oo IS xaq u leh laakiin aan weli soo xareyn canshuur celin sanadka 2018 ama 2019.
- Laakiin haddii aad xareyso canshuur celintii 2019 ugu danbayn Luulyo 15, 2020, waad u qalmi doontaa, in kasta oo aad heli doontid lacag-celintaada xilli ka danbeeya markaad heli lahayd haddii aad horey u xaraysay.
- Qofka u xareeyay canshuurta 2019 ama 2018 sidii qof aan deegaan ahayn (isagoo adeegsanaya foomka IRS 1040-NR).

▪ Haddii aadan weli xareyn canshuur-celinta 2019, waad xereyn kartaa ilaa 15ka Luulyo, 2020 waxaadna ku dari kartaa macluumaadkaaga dhigaalka tooska ah.

Hadaad jeceshahay inaad hesho jeeg (oo ka dhakhsa yar) hubi in IRS haysato cinwaankaaga saxda ah.

- Haddii aad guurtay intii ka danbaysay markii aad canshuurta xareysay, cinwaankaaga IRS u cusbooneysi adoo isticmaalaya IRS Foomka 8822, <https://www.irs.gov/pub/irs-pdf/f8822.pdf>, iyo xafiiska boostada ee degmadaada.

Haddii aad qaadatay dhaqaalaha sooshaal sekuuriti oo aadan u baahnayn in aad xareysato canshuur celin, waxaad sidoo kale heli doontaa lacag celinta si otomaatik ah.